





BADBAADADA DABKA EE GURIGA



Norsk
brannvernforening



brannvernforeningen.no

SHURUUDA QALABKA QIIQA KA DIGA



Waa in guri walba ugu yaraan hal qiiq kadige ku rakiban yahay dabaq kasta. Qalabka qiiqa uriyaa waxay digniin hore u bixiyaan marka dab dhasho. Waa in aad qaylodhaanta ka maqli kartaa qolalka hurdada gudahooda marka albaabbadu xiran yihiin. Bayteriga waa in caadi ahaan laga beddelo sanadkiiba mar. Si joogto ah u tijaabi qalabka qiiqa ka diga adigoo badhanka tijaabinta riixaya.

SHURUUDA QALABKA DABKA LAGU DEMIYO




Waa in guri kaste uu yeesho qalabka dabka lagu demiyo oo ama tuubo ah ama haan ah. Waxaa lagu talinayaa in labadaba lahaysto. Qalabka dabka lagu demiyo waa in la dhigo meel si fudud loo gaari karo. Dhammaan dadka guriga ku nool waa in ay ogaadaan halka qalabku yaallo. Si taxaddar leh u akhriso tilmaamaha ku saabsan sida loo isticmaalo.

KA HORTAGGA DABKA 1



Isha ku hay shooladda marka aad isticmaalayso. Hadii wax kale kaa mashquuliyo cuntada aad karinayso, wada dami dhardhaarada shoolada. Ku rakibo shoolada qalabka loo yaqaan waardiyaaha shoolada ee damin kara shoolada. Taxaddar muuji markaad isticmaalaysid dab ololaya. Weligaa ha ka bixin qol shumac daaran dhex yaal. Shumacyada daaran lama ag dhigi karo waxyaalo guban og. Dambaska ku shub meel aad hubtid. Dambaska kulul ha ku tuurin baaldiga qashinka.

KA HORTAGGA DABKA 2



Marwalba demi qasaaladaha iyo qallajiyeyaasha marka aad guriga ka baxayso ama seexanaysid. Koronto yaqaannada la xaqijiyey oo kaliya ayaa loo oggol yahay in ay rakibaan ama hagaajiyaan korontada iyo qalabka korontada ku shaqeeya. Meelaha la gubo waxay badanaaba ka bilowdaan waxyaabaha dhismaha loo isticmaalo, kartoonaada iyo qashino kale. Hubi in jaranjarooyinka iyo garaashyada aanay oolin alaab guban og. Sanduuqa qashinka dhig meel ka fog dhismeyaasha.

HAB DHAQANKA XILIGA DABKU KOCO



1. BADBAADI

Hubi in dhamaan dadka guriga joogaa nabad kagaso baxaan. In la dhexmaro qiiqu waa khatar. Albaabbada xir. Tag barta horey loogu heshiiyey in la isugu yimaaddo.

2. KA WAR GELI


Ogaysii waaxda dabdemiska adigoo wacaya lambarkooda xaaladaha degdega ee 110. Sheeg cinwaanka dhismaha gubanaya oo saxan.

3. DEMI

Haddii dabku uusan weli aad u weyneyn, isku day in aad ku demiso tuubada dabka ama haanta dab deminta. Khatar ha is gelin adigu. Qiiqu aadbuu u sun badan yahay.


Adiga ayaa go'aan sanaya sidii aad qodobadan ukala hor marin lahayd, iyadoo ku xidhan hadba qiimayntaada xaalada. Waxaa waxtar leh in si joogto ah loo sameeyo carbisyo dabka khuseeya.

KA HORTAGA DHAAWACYADA DABEED EE CARUURTA




- Iska ilaali cabitaanka kulul markaad ilmo jaqsiinaysid ama ilmo haysid.
- Hubi in aysan caruurtu u dhawaan karin meelaha kulul sida qalabka xaabada lagu shido ee guryaha lagu kulayliyo, hiitarada, shoolada iwm.
- Ilaali xaraarada biyaha ee qubayska iyo in caruurtu aysan biyo kulul shubin. Miisaan heerkulka haanta biyaha kulaylisa.

KA HORTAGA DHAAWACYADA DABKA EE CARUURTA



- Ka fogee caruurta digsiyada karaya.
- Fiirro gaar ah uyeelo meeshaad dhigaysid kildhiyada biyaha lagu karsado ee korontada ku shaqeeya iyo fiiladoodaba.
- Ka taxadar miisaska maradu saaran tahay, ilmuhu wuu jiidi karaa marada wixii saaranina way kusoo dhici karaan sida koob shaaha, shumaca iwm.

HADII ILMUHU GUBTO



- Ku qabooji biyo xaraaradoodu/kulaylka qiyaastii tahay 20 digrii xili ilaa 20 daqiiqo ah kolkaad uga shaki qabtid in dhaawac wayn oo dab ah. Taladani waa mid khusaysa da kasta.

XASUKUSO 20 - 20



Buuggan macluumaadka waxaa lagu heli karaa in ka badan 30 luqadood oo kala duwan waxaana laga heli karaa barta internetka Ururka Badbaadinta Dabka ee Norway: www.brannvernforeningen.no/brannsikker